



# AKHRI

– SIDAN AYAAD UGU AQRIN KARTAA CUNUGGAAGA  
0-3 SANO

# AKHRI – SIDAN AYAAD UGU AQRIN KARTAA CUNUGGAAGA 0-3 SANO

## AKHRISKA KA HOR

Waxaad ka caawineysaa cunuggaaga inuu xooga saaro buugga, haddii aad ka hadashiin ka hor intaadan akhrin.

Tusaale ahaan, waxaad sameyn kartaan

- Taabo oo fiiri buugga oo ka hadal sawirrada
- Ka hadal cinwaanka buugga iyo sawirka bogga hore
- Ka hadal waxa buugga ku saabsan yahay
- Eeg gadaasha buugga
- Ka hadal waxa ilmahaagu hore u ogaa

Buuggu wuxuu ku saabsan yahay.

Maxaad u maleynaysaa inay halkaan ka dhacdo...?

Guri

Haa, waxay Red Hood u socotaa guriga ayeeyadeed

## MARKA AAD AKHRINAYSIIIN

Waxaad ka caawineysaa cunuggaaga inuu fahmo waxa ku jira, haddii aad kahadashiin inta aad akhrineyso.

Tusaale ahaan, waxaad sameyn kartaan

- Ka hadal waxaad ka aragtid sawirada. Ku dheji ereyada - labadaba waxyaabaha, ficilada iyo shuurta
- Tilmaama sawirada iyo qoraalka
- Ka hadal oo tusi waxa micnaha erayada ay macnahoodu yihiin
- Ka hadal waxa ilmuhu xiiseeyo
- Akhri dhowr jumladood markiiba iyo ka hadal waxa ku saabsan
- Ka hadal waxa aad u malaynayso bogga ku xiga inuu ku saabsan yahay. Waxaa laga yaabaa in sawirradu ka caawin karaan cunuggaaga inuu qiyaaso oo sheego.

## MARKA AAD AKHRISEEN

Waxaad ka caawineysaa cunuggaaga inuu fahmo waxa ku jira haddii aad ka hadasho ka dib markaad aqriso.

Tusaale ahaan, waxaad sameyn kartaan

- Ka hadal oo tusi waxa buugga ku saabsan yahay
- Eeg sawirrada buugga oo ka hadal waxa ku jira
- Kala hadal waxyaabaha ilmahaagu ka garanayo nolol maal-meedka
- ka hadal waxa ilmahaagu u arko inay ugu xiisaha badan buuggan
- Ka hadal oo soo bandhiga ereyo cusub oo kalmadaha buugga uga isticmaal xaalado kale
- Raadi waxyaabo la taaban karo oo ku jira buugga.

Haddii cunugu uusan ka jawaabin su'aalahaaga, waad ku caawin kartaa adoo siinaya talooyin jawaabaha ama xitaa ka jawaabaya. Waxaad sidoo kale ku celin kartaa waxa ilmuhu dhahayo oo aad ku ballaarisheedha. Xusuusnow in jawaabta cunugga sidoo kale lagu muujin karo luqadda jirka iyo sida dhadhaqaaq wajiga.

Maxaad u malayn inay ahayd mid xiiso leh ...?

Ilkaha Yeey

Haa, yeeygu wuxuu leeyahay ilko fiiqan

Isku day inaad aragto halkaan waa Red Hood, iyo Maxayse noqon kartaa?

